# DAAWADAADA: Atenolol ____mg

**<u>Maxaan u qaadanayaa daawadan?</u>** Waxaad leedahay dhiig kar. Dhiig karku waa halis hadii aan la iska daawayn. Wuxuu sababi karaa faaliga iyo wadno xanuun. Waad u dhiman kartaa hadii aan lagaa daawayn dhiig karka.

**Qaado 1 kiniin aroor kasta intaanad waxkale cunin.** Waxba ha cunin ka hor inta aanad qaadan kiniinka.

**<u>Maxaan dareemi doonaa markaan qaato daawadan?</u>** Mararka qaar waxa jira saamayn kaaga iman karta daawadan. Saamayntu waa wax iska caadi hadii aad dareento. Mararka qaar qaadashada daawada Atenolol waxay keeni kartaa inta aanu jidhkaagu laqabsan inaad isku aragto yalaalugo, dawakhaad, gacmaha/lugaha oo aad ka dareento qabow, madax xanuun.

Saamaynta qaarkood ma dhacaan badanka lakin hadiiba ay dhacdo waxay noqonkaraan halis. **Wac 911 ama aad qolka gargaarka degdega ah isla markiiba haddii aad isku aragto: finan; barar wejiga, dibnaha, carrabka, ama cunaha; dhibaato xagga neefsashada ah ama, dawakhaad daran.**

**<u>Maxaa kale oo aan u baahanahay inaan ogaado?</u>**

1. Waa inaad qaadataa daawadan xataa hadii aad caadi dareemayso.
2. Waa inaad sooo kordhisataa bil walba daawada.
3. Ha cabin sigaar ama ha isticmaalin wax tobaako ah.
4. Hadii aad booqato xafiis kale oo dhakhtar, xarun caafimaad, ama qolka gargaarka degdega ah, waa inaad u sheegtaa inaad dhiig kar leedahay oo aad qaadato daawada Atenolol.

“Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhaktarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su’aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn.”